

HWDSB

Mudanayaal Qoysaska,

Hamilton-Wentworth District School Board (HWDSB), mid kamid ah mudnaanteena kowaad waxaa lagu xaqiijinaysaa in dhammaan ardaydu si badbaadado leh u yimaadaan dugsiga maalinta kasta.

Si loo adkeeyo nidaamkeena maqnaanshaha, waxaanu diyaarin doonaa **SafeArrival**, oo ah nidaamka warbixinta maqnaanshaha ardayga kaas oo horseedaya in si yar oo fudud looga warbixiyo maqnaanshaha. Wuxuu sidoo kale u oggolaanayaa shaqaalaha dugsiga inay dhakhsa uga jawaabaan dhammaan wixii maqnaansho ah ee aan sababtooda la garanaynin. Yoolalkeenu waa in aanu sii wadno in la garto sababta dhammaan maqnaanshaha oo ardaydu ay sheegaan maalin kasta, iyada oo la og yahay inay badbaado qabaan.

SafeArrival, qoysasku waxay kaga soo warbixiyaan maqnaanshaha ilmaha saddex qaab midkood:

1. Isticmaal websaytka SafeArrival ee, go.schoolmessenger.ca. Marka ugu horreysa ee aad isticmaasho websaytka, dooro **Sign Up** si aad uga samaysato xisaab. Dooro **Attendance** kadibna **Report an Absence**.
2. Adiga oo isticmaalaya taleefanka gacanta, kasoo dejiso oo ku shubo **SchoolMessenger app** oo ku jira Apple App Store ama Google Play Store (ama linkiga go.schoolmessenger.ca). Marka kowaad ee aad isticmaalayso app-ka, dooro **Sign Up** si aad xisaab u samaysato. Dooro **Attendance** kadibna **Report an Absence**.
3. La hadal lambarka bilaashka ah ee 844-506-4350 si aad uga warbixiso maqnaanshaha adiga oo isticmaalaya nidaamka taleefanka ee iswada.

Ikhtiyaaradan waxaa la heli karaa 24 saacadood/maalinta, toddoba maalmood toddobaadkii. Waxaad soo sheegi kartaa maqnaanshaha mustaqbalka wakhtiga aad doonto.

Sidoo kale, waxaanu isticmaali nidaamka wargelinta iswada ee **SchoolMessenger Communicate** si aanu ula xidhiidhmo waalidka ilmahoodu aanu iman marka aan marka hore lasoo sheegin maqnaanshaha. Nidaamka wargelinta iswada waxa uu isku dayi doonaa inuu marar badan la xidhiidho waalidka si ay u caddeeyaan oo ay u sharaxaan maqnaanshaha. Haddii uu nidaamku waayo cidda lala xidhiidhayo, shaqaalaha xafiiska ayaa halkaa kasoo ambo qaadi.

Haddii aad wakhti hore kasoo warbixisay maqnaanshaha ilmahaaga adiga oo isticmaalaya lambarka bilaashka ah ee **SafeArrival**, websaytka, ama app-ka taleefanka gacanta, heli MAYSID wargalinahan.

Labo Bilaabo Abriil 23, 2019, fadlan mar hore kasii warbixi maqnaanshaha adiga oo isticmaalaya **SafeArrival** halka aad kasoo diri lahayd qoraal ama taleefan/iimeel aad usoo dirto dugsiga. Taariikhdan, shaqaaluhu waxay bilaabi doonaan inay isticmaalaan wargelinta **SafeArrival** si ay kuugu wargaliyaan in ardaygaagii maqan yahay (marka aanad marka hore soo sheegin maqnaanshihiisa).

Haddii aad qabto wax su'aal ah, fadlan kala hadal xafiiska dugsigaaga ama maamulaha. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan SafeArrival waxaad ka heleysaa bit.ly/safearrivalHWDSB iyo websaytka dugsigaaga.

Waad ku mahadsan tahay dulqaadkaaga iyo wada shaqayntaada inta aanu hirgalinayno nidaamka cusub.